

## Muhuum Bilawga in la ogaado

### Ka-dhaafitaanka AD

Ka dhaafitaan da'da iyo  
Naafada

### DDD

Waaxda Caafimaadka iyo  
Adeegyada Aadanaha ee  
Nebraska, Qaybta  
Naafada Korriinka

*Qaybta DHHS oo  
wuxuu kormeeraa ka-  
dhaafitaanka AD.*

### interRAI

Qalabka qiimaynta ee loo  
isticmaalo in lagu go'aamiyo  
Heerka Daryeelka Xarunta  
Kalkaaliyaha.

Wixi macluumad ah: [https://  
interrai.org](https://interrai.org)

## Talooyinka Qiimaynta

Marka lagu wareysto, maskaxda ku hay  
interRAI waxaa loogu talagalay in lagu  
qiimeeyo qofka Heerka Daryeelka  
Xarunta Kalkaaliyaha.

Marka lagu qiimeeyo, tixgeli  
xaaladdaada caafimaad ee hadda iyo  
awoodda aad u leedahay inaad  
dhammaystirto hawlaha lagaa  
weydiinayo.

Haddi aad fahmi waydo su'aal, u sheeg  
qofka dhamaystiraya qiimaynta. Waad  
weydiin kartaa  
su'aalo.

Qofka buuxinaya interRAI wuxuu u  
joogaa inuu ururiyo macluumaadka  
saxda ah iyo kuwa hadda jira. Tani  
waxa ku jiri kara in lagu weydiyo inaad  
muujiso hawlo gaar ah.

Qiimaynta waxa lagu dhammeeyaa  
iyadoo lagu salaynayo jawaabahaaga  
iyo bandhig kasta.

### DHHS Qeybta Naafada Korriinka

Nebraska State Office Building  
301 Centennial Mall South  
PO Box 98947  
Lincoln, NE 68509-8947  
Taleefoonka: 877-667-6266  
Imayl: dhhs.developmentaldisabilities@nebraska.gov

## Da'da ama Naafada (AD) iyo Adeegyada Laga Cafiye Qofka

## Qiimaynta & Maalgelinta

**NEBRASKA**  
Good Life. Great Mission.

### DEPT. OF HEALTH AND HUMAN SERVICES

*"Ka caawinta dadka inay ku noolaadaan nolol  
wanaagsan"*  
La cusbooneysiiyay 2024

## Heerka Daryeelka ee Xarunta Kalkaalisaada

Heerka Daryeelka Xarunta Kalkaalisaada (NF LOC) waxaa loola jeedaa heerka daryeelka uu u baahan yahay qofka ku nool xarunta kalkaalint Ka fikir daryeelka uu qofku helo marka uu ku nool yahay xarunta kalkaalinta.

Heerka Xarunta Kalkaaliyaha ee **Daryeelka Dadka Waaweyn** (da'da 18 sano iyo ka weyn) waxaa lagu go'aamiyaa iyada oo loo marayo:

- Hawlaha nolol maalmeedka;
- Qodobbada khatarta ah;
- Daaweynta caafimaadka; iyo
- Qodobbada garashada.

Heerka Xarunta Kalkaalisaada ee **dadka da'doodu ka yar tahay 18 jir** waxay leedahay shuruudo shariyeed oo gaar ah oo ku salaysan da'da ilmaha:

- Carrurta dhalata ilaa iyo 47 bilood: Baahiyaha la xidhiidha ugu yaraan hal xaalad caafimaad ama daaweyn la qeexay sida waafaqsan xeerarka Nebraska.
- Carrurta da'doodu u dhaxayso 48 bilood ilaa iyo 17 sano: Wuxuu lagu kulmi karaa mid ka mid ah saddex siyaabood:
  - Ugu yaraan hal xaalad caafimaad ama daaweynta lo bahan yahay;
  - Xaddidyada ugu yaraan lix hawlood oo nolol maalmeedka ah; ama
  - Xaddidyada ugu yaraan afar hawlood oo nolol maalmeedka ah iyo joogitaanka ugu yaraan laba arrimood oo kale.

## Qiimaynta InterRAI

Nebraska waxay isticmaashaa interRAI si ay u go'aamiso

### Heerka daryeelka ee ka dhaafitaanka AD.

InterRAI waa qiimaynta loo isticmaalo in lagu qiiameeyo baahiyaha, meelaha lagu fiican yahay, iyo dookhyada dadka ku nool deegaanka beesha.

InterRAI waa qiimayn la habeeeyey oo la ansaxiyey taas oo laga aqoonsan yahay caalamka oo dhan.

### interRAI waxay eegaysaa:

- Garashada;
- Isgaarsiinta iyo aragtida;
- Xaladada iyo hab-dhaqankaaga;
- Ladnaanta maskaxeed ee bulsho;
- Xaaladda shaqaynta;
- ceshashada;
- Baritanda Cudurrada
- Xaaladaha caafimaadka;
- Xaaladda afka iyo nafaqeeynta;
- Xaaladda maqaarka;
- Daawooyinka;
- Daawaynta iyo hababka;
- Mas'uuliyadda;
- Taageerada bulshada; iyo
- Deegaanka/Bay'ada

## Maalgelinta Adeegyada

Ka dhaafitaanka Medicaid HCBS waxay ogolaataa lacagaha Medicaid ee dawlada dhewe yio lacagaha gobolka, taas oo haddii kale loo isticmaali lahaa in lagu bixiyo adeegyada goobaha hay'adaha, in loo isticmaalo bixinta adeegyada guriga iyo bulshada ku salaysan.

Marka laga soo tago la kulanka NF LOC, waa inaad haysataa Medicaid firfircoo oo aad la kulantaa dhammaan qodobbada u-qalmitaanka ka-dhaafitaanka si aad ugu-qalanto Ka-dhaafitaanka Dadka Da'da ah iyo Naafada (AD) si aad u hesho maalgelin iyo helitaanka adeegyada Ka-dhaafitaanka AD.

Markaa la kulanto NF LOC oo aad doorato hay'adda xiriirinta adeegga, adeeggaaga Iskuduuhaha ayaa kula kulmi doona si uu u dhamaystiro go'aanka xaq u yeelashada oo uu horumariyo qorshahaaga shakhsii ahaaneed.

- Maalgelintaadu waxay ku salaysan tahay qorshahaaga qof-xarunta, marka waa inaad qorshe la samaysaa Iskuduuhaha Adeeggaaga.
- Qorshahaaga waa in la dhammeeyaa oo dhammaan waraaqaha loo baahan yahay waa in la saxeexaa ka hor intaysan bilaaban adeegyada.
- Iskuduuhaha Adeeggaagu wuxuu kuu oggolaan doonaa adeegyadaaga dhaafis isagoo ku saleysan qorshahaaga.
- Qiimaynta interRAI waa in la dhamaystiraa sanad walba si loo sii wado buuxinta shuruudaha NF LOC.
- Dhammaan qodobbada u-qalmitaanka ka-dhaafitaanka waa in la buuxiyaa si sannadle ah.

Heerka Xarunta Kalkaalisaada macluumaadka waxay ku jirtaa xeerarka Nebraska:  
LOC qaangaarka ah ee [471 NAC 44](#) iyo Carrurta LOC oo ah ee [471 NAC 43](#).